128. waxaa idiin yimid Rasuul idinka mida oyna ku darantahay waxa idin dhiba, idiin kuna dadaali, una turid iyo naxariis badan Mu‘miniinta.

لَقَدْ جَآءَكُمْ رَسُولٌ مِّنْ أَنفُسِكُمْ
عَزِيزٌ عَلَيْهِ مَا عَنِتُّمْ حَرِيصٌ عَلَيْكُم
بِٱلْمُؤْمِنِينَ رَءُوفٌ رَّحِيمٌ ﴿١٢٨﴾

129. haddayse jeedsadaan Dadku waxaad dhahdaa Kaalmeeyahaygu waa Ilaahay‘Eebe mooyee Ilaah kalana ma jiro isagaana talo saartay waana Eebaha Carshiga wayn.

فَإِن تَوَلَّوْا۟ فَقُلْ حَسْبِىَ ٱللَّهُ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۖ عَلَيْهِ
تَوَكَّلْتُ ۖ وَهُوَ رَبُّ ٱلْعَرْشِ ٱلْعَظِيمِ ﴿١٢٩﴾

**Aayadda hore waxay fari in lala jahaado Gaalada la Dariska ah Muslimiinta illeen Dhib iyo xumaan lagama waayee, oy kuna ogaadaan Muslimiinta Adayg iyo xoog, illeen Eebaa la jiree, tan kale waxay ka warrami Munaafiqiintii marka quraanku soo dego is warsan jiray ruuxuu wax rumayna u kordhiyey, Mu‘miniintase waxaa u kordha Iimaan koodoodii hore ka sokow, munaafiqiintuse Cudur iyo Xumaan yey kororsadaan, iyagoo gaalo ah yeyna dhintaan, kumana waana qaataan Imtixaamka had iyo jeer, wayna cararaan oo dusaan marka quraan la soo dejiyo illeen Qalbigoodaa Eebe Iilay waxna ma kasayaane, wuxuuna Eebe u soo diray Muslimiinta Rasuul ka mida oo wanaagooda Jecel xumaantoodana neceb, una dadaala Mu‘miniinta, una naxariis badan, ciddiise xaqa ka jeedsata waxba kama saarra, illeen Eebaa kaafiyee, isaga mooyee Ilaah kalana majiree, lana talo saaran, lehna Awood iyo Carshiga wayn, saasayna ku dhammaatay Suuraddii iyadoo caddaysay wax badan oo jahaad, wax bixin, Ballanka, Munaafiqiin, iyo inuu Rasuulku yahay Naxariis loo soo diray Caalamka Khayrna la jecel. At-Tawbah (123-129).**

## Suurat Yuunus سُورَةُ يُونُسَ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Kalimada hore waxay ku tusin Mucjisada Quraanka, Taasin waa Aayaadka Kitaabka falkasan.

الٓر ۚ تِلْكَ ءَايَٰتُ ٱلْكِتَٰبِ ٱلْحَكِيمِ ﴿١﴾

2. Dadka ma waxaa la yaab ku Noqotay inaan u waxyoon Nin ka mida u Dig Dadka, uguna Bishaaree kuwa Rumeeyey inay ku leeyihiin Camal fiican Eebahood agtiisa, waxay Dheheen Gaaladiina kani waa Sixirrow Cad.

أَكَانَ لِلنَّاسِ عَجَبًا أَنْ أَوْحَيْنَآ إِلَىٰ رَجُلٍ مِّنْهُمْ
أَنْ أَنذِرِ ٱلنَّاسَ وَبَشِّرِ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ أَنَّ لَهُمْ قَدَمَ
صِدْقٍ عِندَ رَبِّهِمْ ۗ قَالَ ٱلْكَٰفِرُونَ إِنَّ هَٰذَا
لَسَٰحِرٌ مُّبِينٌ ﴿٢﴾

3. Eebihiin waa kan ku Abuuray Samooyinka iyo Dhulka Lix Maalmood markaas ku istiwooday Carshiga Isagaana maamula Amarka wax Shafeecina Idinkiisa la‘aantiisa ma jiro, Kaasi waa Eebihiinna idin Barbaariya ee Caabuda, Miyeydaan wax Xusuusanayn.

إِنَّ رَبَّكُمُ ٱللَّهُ ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ فِى سِتَّةِ
أَيَّامٍ ثُمَّ ٱسْتَوَىٰ عَلَى ٱلْعَرْشِ يُدَبِّرُ ٱلْأَمْرَ مَا مِن شَفِيعٍ
إِلَّا مِنۢ بَعْدِ إِذْنِهِۦ ذَٰلِكُمُ ٱللَّهُ رَبُّكُمْ
فَٱعْبُدُوهُ أَفَلَا تَذَكَّرُونَ ﴿٣﴾

Quraanka waxaa ku dhan Xigmo iyo Sharaf, Gaaladuna waxay la Yaabeen in Ruux ka mida lagu soo Dejiyo Waxyi inuu u Digo Dadka una Bishaareeyo Kuwa xaqa Rumeeyey ee Wanaag ku leh Eebe Agtiisa, Gaaladuna waxay ku Sheegeen in Nabigu Saaxir yahay, Eebaha Xaqa ahna waa kan Abuuray Cirka iyo Dhulka isagoo Awood, Sharaf iyo Qudraba Mudan, Isagaa wax Maamula, wax Shafeeci kara Idinkiisa La‘aantiisna ma jiro, isagaana Mudan in la Caabudo.
Ibnu Cabbaas wuxuu Yidhi: Markuu Eebe Bixiyey Nabiga Muxamada (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe Korkiisa ha yeelee) Yey Beeniyeen Carabtu Iyagoo sheegi in Eebe ka waynyahay inuu soo Diro Nabi Dada, Markaasaa Eebe soo Dejiyey Aayadda. Taasina waa Doqonnimadii iyo Madax Adaygoodii, Maxaayeelay Dad waa in uun Dad loo soo diro si uu u Toosiyo. Yuunus (1-3).

---

4. Xaggiisaa laydiin Celin Dhammaan Yabooha Eebena waa Xaq, Eebaa Billaaba Abuurka Haddana soo Celin inuu ku Abaal mariyo kuwa Rumeeyey (Xaqa) oo falay Camal Fiican, si Caddaalada, kuwa Gaaloobayna waxaa u Sugnaaday Cabbid kulul iyo Cadaab Daran Gaalnimadooda Darteed.

إِلَيْهِ مَرْجِعُكُمْ جَمِيعًا وَعْدَ ٱللَّهِ حَقًّا إِنَّهُۥ يَبْدَؤُا۟
ٱلْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُۥ لِيَجْزِىَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟
ٱلصَّٰلِحَٰتِ بِٱلْقِسْطِ وَٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ لَهُمْ
شَرَابٌ مِّنْ حَمِيمٍ وَعَذَابٌ أَلِيمٌۢ بِمَا كَانُوا۟
يَكْفُرُونَ ﴿٤﴾

5. Eebe waa kan ka yeelay Qorraxda Ifid Dayaxana Nuur una Qaddaray Meelo ay Socdaan, inaad Ogaataan Tirada Sanooyinka iyo Xisaabta wuxuu u Abuuray Eebe Arrintaas Xaq Wuxuuna u Caddayn Aayaadka Ciddii wax Og.

هُوَ ٱلَّذِى جَعَلَ ٱلشَّمْسَ ضِيَآءً وَٱلْقَمَرَ نُورًا
وَقَدَّرَهُۥ مَنَازِلَ لِتَعْلَمُوا۟ عَدَدَ ٱلسِّنِينَ
وَٱلْحِسَابَ مَا خَلَقَ ٱللَّهُ ذَٰلِكَ إِلَّا بِٱلْحَقِّ يُفَصِّلُ
ٱلْءَايَٰتِ لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ ﴿٥﴾

6. Isbadalka Habeenka iyo Maalinta iyo Abuurka Eebe ee Samooyinka iyo Dhulka aayadbaa ugu sugan Ciddii Dhawrsan.

إِنَّ فِى ٱخْتِلَٰفِ ٱلَّيْلِ وَٱلنَّهَارِ وَمَا خَلَقَ
ٱللَّهُ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ لَءَايَٰتٍ لِّقَوْمٍ
يَتَّقُونَ ﴿٦﴾

Xagga Eebaa loo Noqon Dhammaan Yabooha Eebana waa Dhab oo ah in si Caddalada loogu Abaal mariyo kuwa Wanaaggaa Falay, janno kuwa Gaaloobayna Cadaab daran. Eebana waa kan Dadka ugu Nicmeeyey Qorraxda Ifi iyo Dayaxa Nuuri si waqtiga iyo Xisaabta loogu garto, Habeenka iyo Dharaarta Isbaddelkeedana iyo Abuurka Cirka iyo Dhulka waxaa ku Sugan Calaamooyin Muujin Xaqnimada Eebe iyo Awooddiisa, Ciddii Caqli leh oo Eebe Nuur u Geliyey Qalbiga wuxuu yaqiinsan waynida Awoodda Eebaha Abuuray Cirka, Dhulka, Qorraxda, Dayaxa iyo Khalqiga kalaba Mudanna in La Caabudo. Yuunus (4-6).

7. Kuwaan Rajaynayn la Kulankanaga kuna Raalli Noqday Nolosha Dhaw kuna Xasilay iyo kuwa Halmaansan Aayaadkannaga.

إِنَّ ٱلَّذِينَ لَا يَرْجُونَ لِقَآءَنَا وَرَضُوا۟ بِٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا
وَٱطْمَأَنُّوا۟ بِهَا وَٱلَّذِينَ هُمْ عَنْ ءَايَٰتِنَا غَٰفِلُونَ ﴿٧﴾

8. Kuwaas Hooygoodu waa Naar waxay Kasbanayeen Darteed.

أُو۟لَٰٓئِكَ مَأْوَىٰهُمُ ٱلنَّارُ بِمَا كَانُوا۟
يَكْسِبُونَ ﴿٨﴾

9. Kuwa Rumeeyey Xaqa oo falay Camal wanaagsan wuxuu ku Hanuunin Eebahood Iimaankooda waxaana socon Dhexdooda* Wabiyadii Jannooyinka Naciimo Dhexdeeda iyagoo ku Sugan.

إِنَّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ
يَهْدِيهِمْ رَبُّهُم بِإِيمَٰنِهِمْ ۖ تَجْرِى مِن تَحْتِهِمُ
ٱلْأَنْهَٰرُ فِى جَنَّٰتِ ٱلنَّعِيمِ ﴿٩﴾

10. Yeedhidooduna dhexdeeda waa Eebow waad Nasahantahay, Bariidadooduna waa (Nabadgalyo) Salaan, Ducadooduna waxaa ugu Dambayn Mahad Ilaahbaa leh Eebaha Caalamka ah.

دَعْوَىٰهُمْ فِيهَا سُبْحَٰنَكَ ٱللَّهُمَّ وَتَحِيَّتُهُمْ فِيهَا سَلَٰمٌ ۚ
وَءَاخِرُ دَعْوَىٰهُمْ أَنِ ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ
رَبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿١٠﴾

11. Hadduu Eebe u Dedejiyo Dadka Xumaanta siday khayrka u Dedejistaan waxaa loo Dhamayn lahaa Ajashooda, Waanuse ku Dayn Kuwaan Rajaynayn la kulanknanaga Fasaadkooda iyagoo ku Wareersan.

۞ وَلَوْ يُعَجِّلُ ٱللَّهُ لِلنَّاسِ ٱلشَّرَّ ٱسْتِعْجَالَهُم
بِٱلْخَيْرِ لَقُضِىَ إِلَيْهِمْ أَجَلُهُمْ ۖ فَنَذَرُ ٱلَّذِينَ
لَا يَرْجُونَ لِقَآءَنَا فِى طُغْيَٰنِهِمْ يَعْمَهُونَ ﴿١١﴾

Wuxuu Eebe kaga Warramay Aayadahan Xaalka kuwaan Eebe la Kulankiisa Rajaynayn, oo Adduunyada ka raalli Noqday, Kuna Xasilay, Halmaamayna Aayaadka Eebe ee Naari u Sugnaatay, iyo Kuwa Rumeeyey Xaqa Wanaaggana falay oo Iimaankoodu hanuunin Jannada Nicmadeedana ku Waari, hadalkooduna yahay Xuska Eebe iyo Salaan iyo Mahad Eebe, waana Labo Kooxood oo kala Fog, oo midna Khasaaray Midna Liibaanay.
Tan kale hadduu Eebe ugu Dedejiyo Dadka Xumaanta sida Khayr waa la Dhammayn lahaa, wuxuuse u dayn Daalimiinta Xumaanta iyagoo ku Indha la‘mana ku Habboona Ruux Caqli leh inuu Dedejisto Shar iyo Xumaan, waxaana Xadiith ah: Naftiinna, Caruurtiinna iyo Xoolihiinna ha habaarina ood waafaqdaan Saacad Ijaabo oo laydinka Aqbalo. Yuunus (7-11).

*** hoostooda ama hortooda ( dib u eegaha ) .**

---

12. Markuu Taabto Dadka dhib wuu Na baryayaa isagoo Jiifa, ama Fadhiya ama Taagan, markaan ka faydno Dhibkana wuu iska Socdaa sidii isagoon Na baryinba Dhibkii Taabtay, Saasaa loogu Qorxiyey Xadgudbayaasha waxay Falayeen.

وَإِذَا مَسَّ ٱلْإِنسَٰنَ ٱلضُّرُّ دَعَانَا لِجَنۢبِهِۦٓ أَوْ قَاعِدًا
أَوْ قَآئِمًا فَلَمَّا كَشَفْنَا عَنْهُ ضُرَّهُۥ مَرَّ كَأَن لَّمْ
يَدْعُنَآ إِلَىٰ ضُرٍّ مَّسَّهُۥ ۚ كَذَٰلِكَ زُيِّنَ لِلْمُسْرِفِينَ
مَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿١٢﴾

13. Waxaan Halaagnay Quruumo idinka horreeyey markay Dulmi faleen,

وَلَقَدْ أَهْلَكْنَا ٱلْقُرُونَ مِن قَبْلِكُمْ لَمَّا ظَلَمُوا۟ ۙ

waxayna ula Timid Rasuuladoodii Xujooyin, mana ayan Rumeynayn, Saasaana ku abaal marinaa Qoomka Dambiilayaasha ah.

وَجَآءَتۡهُمۡ رُسُلُهُم بِٱلۡبَيِّنَٰتِ وَمَا كَانُواْ لِيُؤۡمِنُواْۚ
كَذَٰلِكَ نَجۡزِي ٱلۡقَوۡمَ ٱلۡمُجۡرِمِينَ ١٣

14. Markaasaan idinka yeelay kuwo u hadha Dhulka Gadaashood inaan Eegno sidaad Fashaan.

ثُمَّ جَعَلۡنَٰكُمۡ خَلَٰٓئِفَ فِي ٱلۡأَرۡضِ مِنۢ بَعۡدِهِمۡ
لِنَنظُرَ كَيۡفَ تَعۡمَلُونَ ١٤

Waxaa Dadka dabeecaddiisa ka mida in markuu Bukoodo ama Dhibtaablo uu Eebe baryaa isagoo Jiifa ama Fadhiya ama Taagan, markuuse ka faydo Dhibka uu iska Dhaqaaqo sidii isagoon Dhibtaaban ama aan Eebe horay u Baryin, Saasna Waxaa loo Qurxiyey Xad gudbayaasha, wuxuuna Eebe halaagay ummado ka horeeyey Gaaladaas markay Dulmi faleen iyagooy Rasuuladoodii ula yimaadeen Xujooyin oyna Beeniyeen, Saasuuna Eebe ku Abaal mariyaa Dambiilayaasha, idinkana laydiinku reebay Dhulka Gadaashood Imtixaan iyo in Eebe Eego isagoo og waxa la falo.
Waxaana Xadiith ah: Addunyadu waa Macaantahay waana Cagaarantahay, Eebaana idinku Reebay inuu Eego waxaad Fashaan, ee iska Jira Addunyada iyo Haweenka. Yuunus (12-14).

---

15. Marka lagu Akhriyo Korkooda Aayaadkanaga oo Cad Cad waxay Dhahaan kuwaan Rajaynayn la kulankanaga noo keen Quraan aan kan ahayn ama badal, waxaad dhahdaa igama suurowdo inaan ka baddalo agtayda, waxaan uun Raaci waxa lay waxyoodo, waxaan ka cabsan Haddaan Eebe Caasiyo Cadaab Maalin wayn.

وَإِذَا تُتۡلَىٰ عَلَيۡهِمۡ ءَايَاتُنَا بَيِّنَٰتٖ قَالَ ٱلَّذِينَ
لَا يَرۡجُونَ لِقَآءَنَا ٱئۡتِ بِقُرۡءَانٍ غَيۡرِ هَٰذَآ
أَوۡ بَدِّلۡهُۚ قُلۡ مَا يَكُونُ لِيٓ أَنۡ أُبَدِّلَهُۥ مِن تِلۡقَآيِٕ
نَفۡسِيٓۖ إِنۡ أَتَّبِعُ إِلَّا مَا يُوحَىٰٓ إِلَيَّۖ إِنِّيٓ أَخَافُ
إِنۡ عَصَيۡتُ رَبِّي عَذَابَ يَوۡمٍ عَظِيمٖ ١٥

16. Waxaad Dhahdaa Hadduu doono Eebe idinkuma Akhriyeen idinmana Ogaysiiyeen isaga, waxaan ku Nagaaday Dhexdiinna ka hor Cimri ee Meyeydaan wax kasayn.

قُل لَّوۡ شَآءَ ٱللَّهُ مَا تَلَوۡتُهُۥ عَلَيۡكُمۡ
وَلَآ أَدۡرَىٰكُم بِهِۦۖ فَقَدۡ لَبِثۡتُ فِيكُمۡ عُمُرٗا
مِّن قَبۡلِهِۦٓۚ أَفَلَا تَعۡقِلُونَ ١٦

17. Yaa ka Dulmi Badan Cid ku Been Abuuratay Eebe ama Beeniyey Aayaadkiisa, Illeen ma Liibaano Dambiilayaal.

فَمَنۡ أَظۡلَمُ مِمَّنِ ٱفۡتَرَىٰ عَلَى ٱللَّهِ كَذِبًا
أَوۡ كَذَّبَ بِـَٔايَٰتِهِۦٓۚ إِنَّهُۥ لَا يُفۡلِحُ ٱلۡمُجۡرِمُونَ ١٧

Gaaladii Qureesheed ee Makaad waxay Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) marba wax warsadaan oo Xaqa ka Jeedsadaanba waxay warsadeen inuu keeno Quraan kale oo kan ahayn, ama Quraanka wax ka baddalo, markaasuu Eebe ku Celiyey oo faray Nabigu inuu ku Dhaho: Iima suurowdo inaan baddalo, iskaba dhaaf inaan Quraan kale keenee, waxaanse Raaci waxa lay waxyooday, Illeen waxaan ka Cabsan Cadaab Maalin Daran haddan Caasiyo Eebahaye, waxaana jirtay inaan Muddo idinla Noolaa oonan wax idiin sheegin, ee Quraankan Eebaa soo Dejiyey, hadduu doona waxba idinkuma Akhriyeen idinmana Bareen ee Miyeydaan wax kas ahayn. Cid ka Dulmi Badanna ma jirto Cid ku Been Abuuratay Eebe, ama Beenisay Aayaadkiisa, mana Liibaano Dambiile, waxayna ku Tusin Runnimada Quraanka, inuusan Nabigu iskala imaan karin waxna ka baddali karin, waxna ku dari karin, waxaad arki kartaa Warkii Hiriqle, Cabdullahi Binu Salaamo, Dimaam Binu thaclabo, Camar Binu Caas iyo Dad badan oo kale oo dhammaan Sheegi Runnimada Quraanka iyo nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee). Yuunus 15-17).

18. Waxay Caabudayaan Eebe ka sokow waxaan Dhibayn Anfaceyna waxayna Odhan kuwanu waa Shafeecayaalkanaga Eebe Agtiisa, waxaad Dhahdaa ma waxaad uga warramaysaan Eebe wuxuusan ku Ogayn Samooyinka iyo Dhulka, wuxuu ka Nasahanyahay oo ka Sarreeyaa waxay la Wadaajiyeen Eebe.

وَيَعۡبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَا لَا يَضُرُّهُمۡ
وَلَا يَنفَعُهُمۡ وَيَقُولُونَ هَٰٓؤُلَآءِ شُفَعَٰٓؤُنَا
عِندَ ٱللَّهِۚ قُلۡ أَتُنَبِّـُٔونَ ٱللَّهَ بِمَا لَا يَعۡلَمُ
فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَلَا فِي ٱلۡأَرۡضِۚ سُبۡحَٰنَهُۥ وَتَعَٰلَىٰ
عَمَّا يُشۡرِكُونَ ١٨

19. Dadku wuxuu ahaa Ummad Kaliya Markaasay Iskhilaafeen, haddayan Jirin Kalimad Eebahaa u horraysay waa la kala Xukmin lahaa Dhexdooda waxay isku diidanyihiin.

وَمَا كَانَ ٱلنَّاسُ إِلَّآ أُمَّةٗ وَٰحِدَةٗ فَٱخۡتَلَفُواْۚ
وَلَوۡلَا كَلِمَةٞ سَبَقَتۡ مِن رَّبِّكَ لَقُضِيَ
بَيۡنَهُمۡ فِيمَا فِيهِ يَخۡتَلِفُونَ ١٩

20. Waxay Odhan Gaaladu maa lagaga soo Dejiyo Xagga Eebahaa Aayad, waxaad dhahdaa waxa Maqan Eebe umbaa iska leh, ee Suga Anuguna waan idinla Sugiye.

وَيَقُولُونَ لَوۡلَآ أُنزِلَ عَلَيۡهِ ءَايَةٞ مِّن رَّبِّهِۦۖ
فَقُلۡ إِنَّمَا ٱلۡغَيۡبُ لِلَّهِ فَٱنتَظِرُوٓاْ إِنِّي مَعَكُم
مِّنَ ٱلۡمُنتَظِرِينَ ٢٠

Eebe wuxuu ku Diidi Gaaladii la Caabuday Eebe wax kale iyagoo u malayn inay wax tari ama u Shafeeci, markaasuu Eebe u Sheegay in waxaan Eebe ahayn wax Anfacayn, wax Eebe looga Warramina uusan jirin, Eebana wax walba oo Xumaana waa ka Nasahanyahay, Dadkuna waxay ku Sugnaayeen Jid kaliya oo Xaqa ah, Markaasay Iskhilaafeen oo Qaarba wax Eebe ka soo hadhay Caabudeen, Eebase waa Dulbadane oo Dadka Ciqaabta uma soo Dedejiyo iyagoon loo Caddaynin Xaqa. waxayna Codsadeen in Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) lagu soo Dejiyo Aayado Muuqda, Sidii Ushii Nabi Muuse iyo Hashii Nabi Saalax iyo wax la mida, Awooddase Eebaa iska leh, Isagaana soo Dejiya wuxuu Doono ee suga nabiguna waa idinla Sugiye, si aad u aragtaan Xukunka Eebe iyo Awooddiisa. Dhabtuna waa in Gaalo Dhunsantahay, Halaag iyo Ciqaabna u Dambayso, Xaquna Cad yahay, Ciddii rabtana u Muuqdo, Mudanyahay in la Raaco, lana Rumeeyo, oo lagu Dhaqmo. Yuunus (18-20).

---

21. Markaan Dhadhansiinno Dadka Naxariis Dhibaato ka dib Taabatay waxaa soo Baxa iyagoo dhagri Aayaadkanaga, waxaa Deg-Deg badan Ciqaabta Eebe Malaa‘igtanaduna way Qori waxaad Dhagraysaan.

وَإِذَآ أَذَقۡنَا ٱلنَّاسَ رَحۡمَةٗ مِّنۢ بَعۡدِ ضَرَّآءَ مَسَّتۡهُمۡ إِذَا
لَهُم مَّكۡرٞ فِيٓ ءَايَاتِنَاۚ قُلِ ٱللَّهُ أَسۡرَعُ مَكۡرًاۚ إِنَّ رُسُلَنَا
يَكۡتُبُونَ مَا تَمۡكُرُونَ ٢١

22. Eebe waa Kan Idinku Wada Barriga iyo Baddaba markay ahaadaan Doonta oo ay ku socdaan Dabayl Fiican oo ay Markaas ku Farxaan oy u Timaaddo Dabayl Daran ugana yimaaddo hirku Dhan kasta oy una Maleeyaan in la koobay (la Halaagay) waxay Baryaan Eebe iyagoo u kaliyeeli

هُوَ ٱلَّذِي يُسَيِّرُكُمۡ فِي ٱلۡبَرِّ وَٱلۡبَحۡرِۖ حَتَّىٰٓ إِذَا كُنتُمۡ فِي
ٱلۡفُلۡكِ وَجَرَيۡنَ بِهِم بِرِيحٖ طَيِّبَةٖ وَفَرِحُواْ بِهَا جَآءَتۡهَا
رِيحٌ عَاصِفٞ وَجَآءَهُمُ ٱلۡمَوۡجُ مِن كُلِّ مَكَانٖ
وَظَنُّوٓاْ أَنَّهُمۡ أُحِيطَ بِهِمۡ دَعَوُاْ ٱللَّهَ مُخۡلِصِينَ لَهُ

Diinta Iyagoo (Dhihi) Haddaad naga koriso tan waannu kugu Mahdin.

ٱلدِّينَ لَئِنْ أَنجَيْتَنَا مِنْ هَٰذِهِۦ
لَنَكُونَنَّ مِنَ ٱلشَّٰكِرِينَ ﴿٢٢﴾

23. Markuu koriyeyna Markaas ku xad gudbaan Dhulka Xaq Darro Dadoow waxaad uun ku Xad Gudbaysaan Naftiinna, waa uun Nolosha Dhaw Markaas Xagganagaa laydiin soo Celin waxaana idiinka warramaynaa waxaad Camal Falayseen.

فَلَمَّآ أَنجَىٰهُمْ إِذَا هُمْ يَبْغُونَ فِى ٱلْأَرْضِ بِغَيْرِ ٱلْحَقِّ ۗ
يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِنَّمَا بَغْيُكُمْ عَلَىٰٓ أَنفُسِكُم ۖ
مَّتَٰعَ ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا ۖ ثُمَّ إِلَيْنَا مَرْجِعُكُمْ
فَنُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٢٣﴾

Aayadahan wuxuu Eebe kaga warrami Dabeecadda Dadka oo ah in marka Dhibaato Taabatana uu Eebe baryo isuna Dulleeyo, marka Khayr iyo Wanaag uu helana uu isla waynaado oo Kibro, Dhagar iyo Khayaamana la darbado, Eebaase Abaal mariya oo ka Jaasiya, Bad iyo Barribana Eebaa iska leh Mudanna Cibaado, waxaase Dhab ah in Xumaantu ku Noqon Ciddii Fashay Eebana Abaal marin Markuu u Noqdo.
Saas darteed waa in had iyo Jeer Eebe si Dhab ah loo Caabudo, Dhibaato iyo Barwaaqo, Cudur iyo Caafimaad iyo Gaajo iyo Dharagba iwm ... Yuunus (21-23).

---

24. Nolosha Adduunyo waa uun Biyo oo kale oon ka soo Dejinay Samada oo ku Dheeḥnay waxa ka soo baxa Dhulka oo ah wuxuu Dadku Cuno iyo Xooluhu markuu dhulku Qurux ka Buuxsamo oy isqurxiso oo Dadkeedu u Maleeyo inay Karaan (Goosashadeeda) yaa waxaa u Yimaadda Amarkannagii Habeen ama Dharaar waxaana ka yeelaa wax la Shafay sidii iyadoon Shalay Jirin, Saasaana ugu Caddaynay Aayaadka Qoomkii Fikiri.

إِنَّمَا مَثَلُ ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا كَمَآءٍ أَنزَلْنَٰهُ مِنَ ٱلسَّمَآءِ
فَٱخْتَلَطَ بِهِۦ نَبَاتُ ٱلْأَرْضِ مِمَّا يَأْكُلُ ٱلنَّاسُ
وَٱلْأَنْعَٰمُ حَتَّىٰٓ إِذَآ أَخَذَتِ ٱلْأَرْضُ زُخْرُفَهَا وَٱزَّيَّنَتْ
وَظَنَّ أَهْلُهَآ أَنَّهُمْ قَٰدِرُونَ عَلَيْهَآ أَتَىٰهَآ
أَمْرُنَا لَيْلًا أَوْ نَهَارًا فَجَعَلْنَٰهَا حَصِيدًا كَأَن لَّمْ
تَغْنَ بِٱلْأَمْسِ ۚ كَذَٰلِكَ نُفَصِّلُ
ٱلْءَايَٰتِ لِقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ ﴿٢٤﴾

25. Eebe wuxuu ugu yeedhi (Dadka) Guriga Nabadgalyada (Jannada) wuxuuna ku Hanuuniyaa Cidduu Doono Jid Toosan (Xaqa).

وَٱللَّهُ يَدْعُوٓا۟ إِلَىٰ دَارِ ٱلسَّلَٰمِ وَيَهْدِى مَن يَشَآءُ
إِلَىٰ صِرَٰطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٢٥﴾

26. Kuwa Wanaagga Falayna waxaa u Sugnaaday Wanaag (Janno) (Aakhiro) iyo Siyaado (Aragga Eebe) mana haleelo Wajigooda Boodh iyo Dulli

۞ لِّلَّذِينَ أَحْسَنُوا۟ ٱلْحُسْنَىٰ وَزِيَادَةٌ ۖ وَلَا يَرْهَقُ
وُجُوهَهُمْ قَتَرٌ وَلَا ذِلَّةٌ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ أَصْحَٰبُ ٱلْجَنَّةِ ۖ هُمْ

فِيهَا خَٰلِدُونَ ﴿٢٦﴾

midna kuwaasuna waa Asaxaabta (Ehelka) Jannada wayna ku waari Dhexdeeda.

Aayadda hore wuxuu Eebe ku Matalay Nolosha Adduunyo Roob soo Da'ay oo Dhulka Cunno ka soo Saaray mid Dad Cuno iyo mid Xoolo Cunaanba, Markii Dhulkii Quruxsanaaday oo ubixii Baxay oo Doogii isqabsaday oo Dadku u Maleeyeen inuu Goosan Beerahoodii uu amarkii Eebe u yimid oo Eber ka yeelay sidii iyadoon Shalay wax ku oollin,
Nolosha Addunyana waa uun saas oo waxay isukaa qurxisaba markay ku dhaafto ama aad Dhaaftid Wanaageed iyo Quruxdeed wax ma taraan, waxaase wax tara Camal Fiican iyo Jidka Nabadgalyo waana midka Eebe u Yeedhi kuna Toosiyo Cidduu Doono, Ciddii Wanaagga Fashana waxay heli Wanaag, Janno, Aragga Wajiga Eebaha Deeqda leh iyo Khayr, Dulmi iyo Xumaanna ma arkaan, Jannadana way ku waari.
Waxaa Sugnaaday in marka Jannada la galo in loo dhawaaqi Ehelu Jannada in Eebe u oofiyo Ballankoodii waxayna Arkaan Ilaahood waana waxa Ilu ugu Farax badantahay uguna Jeceshahay. Yuunus (24-26).

---

وَٱلَّذِينَ كَسَبُوا۟ ٱلسَّيِّـَٔاتِ جَزَآءُ سَيِّئَةٍۭ بِمِثْلِهَا
وَتَرْهَقُهُمْ ذِلَّةٌ مَّا لَهُم مِّنَ ٱللَّهِ مِنْ عَاصِمٍ كَأَنَّمَآ
أُغْشِيَتْ وُجُوهُهُمْ قِطَعًا مِّنَ ٱلَّيْلِ مُظْلِمًا
أُو۟لَٰٓئِكَ أَصْحَٰبُ ٱلنَّارِ هُمْ فِيهَا خَٰلِدُونَ ﴿٢٧﴾

27. kuwa kasbaday xumaan Abaalkood waa Xumaan la mida, waxaana haleeli dulli wax Eebe ka ilaalinna ma jiro, waxaadna moodaa in lagu daboolay wajigooda goosin habeen oo mugdi ah, kuwaasu waa Asaxaabta (Ehelka) Naarta wayna ku waari dhexdeeda.

وَيَوْمَ نَحْشُرُهُمْ جَمِيعًا ثُمَّ نَقُولُ لِلَّذِينَ أَشْرَكُوا۟
مَكَانَكُمْ أَنتُمْ وَشُرَكَآؤُكُمْ فَزَيَّلْنَا بَيْنَهُمْ وَقَالَ
شُرَكَآؤُهُم مَّا كُنتُمْ إِيَّانَا تَعْبُدُونَ ﴿٢٨﴾

28. ka warran maalintaan kulminaynno Dhammaan markaas aan ku dhahaynno kuwii la wadaajiyey (Gaalobay) Meejiinna ahaada idinka iyo kuwaad la wadaajiseen markaasaan kala gaynay dhexdooda, waxayna dheheen kuway la wadaajiyeen (Eebe) annaga nama aydaan Caabudayn.

فَكَفَىٰ بِٱللَّهِ شَهِيدًۢا بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمْ إِن كُنَّا عَنْ عِبَادَتِكُمْ
لَغَٰفِلِينَ ﴿٢٩﴾

29. waxaa markhaati dhexdeenna ugu filan Eebe inaan Cibaadadiinna Moogayn.

هُنَالِكَ تَبْلُوا۟ كُلُّ نَفْسٍ مَّآ أَسْلَفَتْ وَرُدُّوٓا۟ إِلَى ٱللَّهِ
مَوْلَىٰهُمُ ٱلْحَقِّ وَضَلَّ عَنْهُم مَّا كَانُوا۟ يَفْتَرُونَ ﴿٣٠﴾

30. halkaasaa lagu imtixaami naf kasta waxay hor marsatay, waxaana loo celiyaa Ilaaha Sayidkooda xaqa ah waxaana ka dhumay waxay been abuuranayeen.

Waxaa la soo kulmin Maalinta Qiyaame Dadkoo dhan, markaasaa Eebe faraa gaalada inay halkooda joogaan iyaga iyo waxay caabudayeen, waana lakala kaxeeyaa, kuwii la Caabudayeyna way dafiraan inay caabudi jireen, oy waliba Eebe marag gashan inayan ogayn cibaadadooda, halkaasaana lagu Imtixaami Naf kasta waxay hor marsatay, waxaana loo celin Dadka Eebahooda xaqa ah, waxaana gaalada ka dhumi waxay abuuranayeen.
Waxayna Muujin arrintaasu sida ciddii waxaan Eebe ahayn caabudda ama raacda ay isu dafiri Maalinta Qiyaame, wax ay isu tarina ma jiro.
Saas darteed waa in Eebe sharcigiisa la raaco loona hogaansamo. Yuunus (27-30).

31. waxaad dhahdaa yaa idinka Arsaaqa Samada iyo dhulka, yaana hanta maqalka, Aragyada, yaana ka soo bixiya wax Nool wax dhintay, kana soo bixiya wax Dhintay wax Nool, yaana Maamula Amarka waxay ku odhan Eebe, waxaad dhahdaa miyeydaan Dhawrsanayn.

قُلْ مَن يَرْزُقُكُم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ وَٱلْأَرْضِ أَمَّن يَمْلِكُ
ٱلسَّمْعَ وَٱلْأَبْصَٰرَ وَمَن يُخْرِجُ ٱلْحَىَّ مِنَ ٱلْمَيِّتِ
وَيُخْرِجُ ٱلْمَيِّتَ مِنَ ٱلْحَىِّ وَمَن يُدَبِّرُ ٱلْأَمْرَ ۚ
فَسَيَقُولُونَ ٱللَّهُ ۚ فَقُلْ أَفَلَا تَتَّقُونَ ﴿٣١﴾

32. kaasi waa Ilaahiin Eebihiinna xaqa ah, maxaase xaqa ka dambeeya (Ka duway) oon baadi ahayn, ee xaggee laydiin Leexin.

فَذَٰلِكُمُ ٱللَّهُ رَبُّكُمُ ٱلْحَقُّ ۖ فَمَاذَا بَعْدَ ٱلْحَقِّ
إِلَّا ٱلضَّلَٰلُ ۖ فَأَنَّىٰ تُصْرَفُونَ ﴿٣٢﴾

33. Saasay ugu Waajibtay Kalimadii Eebahaa kuwa faasiqoobay oo ah inayan rumeeynin (Xaqa).

كَذَٰلِكَ حَقَّتْ كَلِمَتُ رَبِّكَ عَلَى ٱلَّذِينَ فَسَقُوٓا۟
أَنَّهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿٣٣﴾

34. waxaad dhahdaa ma ka midyihiin Shurakadiinna cid billowda Abuurka Soona celiya, waxaad dhahdaa Eebaa Bilaaba khalqiga soona celiya ee xaggee loo iili.

قُلْ هَلْ مِن شُرَكَآئِكُم مَّن يَبْدَؤُا۟ ٱلْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُۥ ۚ قُلِ
ٱللَّهُ يَبْدَؤُا۟ ٱلْخَلْقَ ثُمَّ يُعِيدُهُۥ ۖ فَأَنَّىٰ تُؤْفَكُونَ ﴿٣٤﴾

35. waxaad dhahdaa ma ka midyahay shurakadiinna cid ku hanuunin xaqa, waxaad dhahdaa Eebaa ku hanuunin Xaqa, mase mid ku hanuunin Xaqa yaa mudan in la raaco mise midaan hanuuninayn in la hanuuniyo mooyee, maxaad leedihiin sideed xukumaysaan.

قُلْ هَلْ مِن شُرَكَآئِكُم مَّن يَهْدِىٓ إِلَى ٱلْحَقِّ ۚ قُلِ ٱللَّهُ يَهْدِى
لِلْحَقِّ ۗ أَفَمَن يَهْدِىٓ إِلَى ٱلْحَقِّ أَحَقُّ أَن يُتَّبَعَ أَمَّن لَّا
يَهِدِّىٓ إِلَّآ أَن يُهْدَىٰ ۖ فَمَا لَكُمْ كَيْفَ تَحْكُمُونَ ﴿٣٥﴾

36. mana raaco badankoodu waxaan malo ahayn, malana waxba kama taro xaqa, Eebana waa ogyahay waxay falayaan.

وَمَا يَتَّبِعُ أَكْثَرُهُمْ إِلَّا ظَنًّا ۚ إِنَّ ٱلظَّنَّ لَا يُغْنِى مِنَ ٱلْحَقِّ
شَيْـًٔا ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٌۢ بِمَا يَفْعَلُونَ ﴿٣٦﴾

Aayaddu waxay ka warrami sida Eebe ugu samo falay Dadka una Arsuqay maqal iyo aragna u siiyey, iyo Awoodda Eebe iyo inuu isagu wax maamulo, waana Eebaha Xaqa ah ee sugan, wax kale oo awood lehna ma jiro, illeen Eebaa khalqiga Bilaabay soona celine, isagaana hanuuniya Dadka, mudanna in la raaco oo la caabudo, gaaladuse waxaan malo ahayn kuma socdaan, malo iyo shakina waxba xaqa kama taraan Eebana waa ogyahay waxay fali xaq diidayaashu.

Taasina waxay muujin in Eebe uun yahay kan Awoodda leh, mudanna in la caabudo, sharcigiisana la raaco, illeen isagaa wax hanuuniyee. Yuunus (31-36).

37. ma aha Quraankanu mid laga been abuurtay Eebe ka sokow, waase u rumeeyaha wixii ka horreeyey iyo caddaynta Kitaabka (Xukunka) shakina kuma jiro wuxuuna ka ahaaday Eebaha Caalamka.

وَمَا كَانَ هَٰذَا ٱلْقُرْءَانُ أَن يُفْتَرَىٰ مِن دُونِ ٱللَّهِ وَلَٰكِن
تَصْدِيقَ ٱلَّذِى بَيْنَ يَدَيْهِ وَتَفْصِيلَ ٱلْكِتَٰبِ لَا رَيْبَ
فِيهِ مِن رَّبِّ ٱلْعَٰلَمِينَ ﴿٣٧﴾

38. mise waxay odhan wuu Been abuurtay, waxaad dhahdaa la imaadda suurad la mida una yeedha ciddaad kartaan oo Eebe ka soo hadhay haddaad run sheegaysaan.

أَمْ يَقُولُونَ ٱفْتَرَىٰهُ قُلْ فَأْتُوا۟ بِسُورَةٍ مِّثْلِهِۦ وَٱدْعُوا۟
مَنِ ٱسْتَطَعْتُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٣٨﴾

39. waxayse beeniyeen waxayna cilmigiisa koobin (Quraanka) uusanna wali u imaanin aayahiisu saasayna u beeniyeen kuwii ka horreeyey ee bal day siday noqotay Cidhibtii Daalimiinta.

بَلْ كَذَّبُوا۟ بِمَا لَمْ يُحِيطُوا۟ بِعِلْمِهِۦ وَلَمَّا يَأْتِهِمْ تَأْوِيلُهُۥ
كَذَٰلِكَ كَذَّبَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ فَٱنظُرْ كَيْفَ
كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٣٩﴾

40. waxaa ka mida Dadka mid rumeyn Quraanka iyo midaan rumaynayn Eebana waa ogyahay Mufsidiinta.

وَمِنْهُم مَّن يُؤْمِنُ بِهِۦ وَمِنْهُم مَّن لَّا يُؤْمِنُ بِهِۦ
وَرَبُّكَ أَعْلَمُ بِٱلْمُفْسِدِينَ ﴿٤٠﴾

**Quraankuna waa xaq sugan oo Eebe soo Dejiyey, una rumeyn Xaqii ka horreeyey, waana xaq caddeeye, Shakina kuma jiro, Nabiguna iskalama imaanin, iyaba ha keeneen suurad la mida intay u kaalmaystaan cidday doonaan hadday run sheegi, waxayna beeniyeen waxayna cilmigiisa gaadhin isagoon wali fasirkiisii u imaanin, waxayse la mid yihiin kuwii ka horreeyey ee beeniyey Xaqii ee Daalimiinta ahaa lana halaagay, cidna way rumeyn quraanka, midina way beenin, Eebaase og Mufsidiinta. Yuunus (37-40).**

---

41. hadday ku Beeniyaan waxaad dhahdaa Anugu waxaan leeyahay Camalkayga idinkuna camalkiinna idinku bari baad ka tihiin waxaan fali anna bari baan ka ahay waxaad falaysaan.

وَإِن كَذَّبُوكَ فَقُل لِّى عَمَلِى وَلَكُمْ عَمَلُكُمْ
أَنتُم بَرِيٓـُٔونَ مِمَّآ أَعْمَلُ وَأَنَا۠ بَرِىٓءٌ مِّمَّا تَعْمَلُونَ ﴿٤١﴾

42. waxaa ka mida gaalada kuwo ku dhagaysan ma adaa wax maqashiin kara mid dhaga la‘ oon wax kasayn.

وَمِنْهُم مَّن يَسْتَمِعُونَ إِلَيْكَ أَفَأَنتَ تُسْمِعُ ٱلصُّمَّ
وَلَوْ كَانُوا۟ لَا يَعْقِلُونَ ﴿٤٢﴾

43. waxaana ka mida mid ku soo dhawri ma adaa toosin kara mid indha la‘ oon wax arkayn.

وَمِنْهُم مَّن يَنظُرُ إِلَيْكَ أَفَأَنتَ تَهْدِى ٱلْعُمْىَ
وَلَوْ كَانُوا۟ لَا يُبْصِرُونَ ﴿٤٣﴾

44. Eebe kama dulmiyo Dadka waxba, hasayeeshee Dadkaa Naftiisa Dulmiya.

إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَظْلِمُ ٱلنَّاسَ شَيْـًٔا وَلَٰكِنَّ ٱلنَّاسَ
أَنفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿٤٤﴾

45. Maalinta la kulminna waxay la mid noqon iyagoon nagaanin Saacad Maalin mooyee, wayna is aqoonsan dhexdooda, waxaana khasaaray kuwa beeniyey la kulanka Eebe mana hanuunsanayn.

ويوم يحشرهم كأن لم يلبثوا إلا ساعة من النهار
يتعارفون بينهم قد خسر الذين كذبوا بلقاء الله
وما كانوا مهتدين ﴿٤٥﴾

Wuxuu Eebe faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu u sheego gaalo hadday beeniyaan inuu bari ka yahay Camalkooda, iyana ay bari ka yihiin camalkiisa, cid dambi cid kale qaadina ayan jirin, cid xaqa ka Indha la' iyo mid ka dhaga la'na cid wax tusi ama maqashiin ma jirto, Eebana cidna ma dulmiyo, Dadkaase Naftooda dulmiya, Maalinta la soo kulminna waxay la mid noqon iyagoon nagaanin Saacad Maalmeed Mooyee. wayna is aqoonsan, waxaana khasaaray kuwa beeniyey la kulanka Eebe mana hanuunsana. Yuunus (41-45).

---

46. haddaan ku tusinno waxaannu ugu goodin qaarkiis ama aan ku oofsanno xagganaga umbaa loo soo celin, markaasna Eebaa ka maraga waxay falayaan.

وإما نرينك بعض الذي نعدهم أو نتوفينك فإلينا
مرجعهم ثم الله شهيد على ما يفعلون ﴿٤٦﴾

47. Ummad kasta Rasuulbay leedahay, markuu u yimaaddo Rasuulkooduna waxaa lagu kala xukmin caddaalad lamana dulmiyo.

ولكل أمة رسول فإذا جاء رسولهم قضي
بينهم بالقسط وهم لا يظلمون ﴿٤٧﴾

48. waxayna odhan gaaladu waa goorma yaboohaas (Gooddiga) haddaad runsheegaysaan.

ويقولون متى هذا الوعد إن كنتم صادقين ﴿٤٨﴾

49. waxaad dhahdaa uma hanto naftayda Dhib iyo nacfi midna wuxuu Eebe doono mooyee, Ummad kastana waxay leedahay Ajal (Muddo) markay Ajashoodu timaadana lagama dib mariyo Saacad lagamana hor mariyo.

قل لا أملك لنفسي ضرا ولا نفعا إلا ما شاء الله
لكل أمة أجل إذا جاء أجلهم فلا يستأخرون ساعة
ولا يستقدمون ﴿٤٩﴾

Hadduu Eebe tusiyo Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) isagoo nool ciqaabta gaalada ku dhici waa wanaag, haddii kalana xagga Eebe umbaa loo soo celin gaalada, Eebana waa u marag waxay fali. Ummad kasta oo rasuul loo soo diro markuu u yimaaddo rasuulkoodu waxaa lagu kala xukmin dhexdooda caddaalad lamana dulmiyo, waxayse odhan waa goorma yaboohu haddaad runsheegaysaan, wuxuuna Eebe faray rasuulka (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu u sheego inuusan hananin dhib iyo nacfi midna, wuxuu Eebe doono mooyee, Ummad kastana waxay leedahay Muddo ayna ka hor maraynin kana dib dhacaynin.
Taasina waxay sheegi in awoodda iyo ogaanshuhuba Eebe iska leeyahay. Yuunus (46-49).

50. waxaad dhahdaa bal ka warrama hadduu idiinku yimaaddo Cadaabkiisu (Eebe) Mir ama Maalin maxay ka dedejisan xaggiisa Dambiilayaashu.

قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِنْ أَتَىٰكُمْ عَذَابُهُۥ بَيَٰتًا أَوْ نَهَارًا مَّاذَا يَسْتَعْجِلُ مِنْهُ ٱلْمُجْرِمُونَ ﴿٥٠﴾

51. Mise markuu dhacaad rumaynaysaan hadda idinkoo Dedejisanayey.

أَثُمَّ إِذَا مَا وَقَعَ ءَامَنتُم بِهِۦٓ ءَآلْـَٔـٰنَ وَقَدْ كُنتُم بِهِۦ تَسْتَعْجِلُونَ ﴿٥١﴾

52. markaasaa lagu odhan kuwii dulmi falay dhadhamiya cadaabka waaridda, miyaana laydinka abaal marinin waxaad kasbanayseen mooyee.

ثُمَّ قِيلَ لِلَّذِينَ ظَلَمُوا۟ ذُوقُوا۟ عَذَابَ ٱلْخُلْدِ هَلْ تُجْزَوْنَ إِلَّا بِمَا كُنتُمْ تَكْسِبُونَ ﴿٥٢﴾

53. waxay ku warsan ma xaqbaa isagu, dheh haa Eebahaybaan ku dhaartaye isagaa Xaqa, idinkuna ma tihidiin kuwo (Eebe) daalin.

۞ وَيَسْتَنۢبِـُٔونَكَ أَحَقٌّ هُوَ ۖ قُلْ إِى وَرَبِّىٓ إِنَّهُۥ لَحَقٌّ ۖ وَمَآ أَنتُم بِمُعْجِزِينَ ﴿٥٣﴾

54. hadday naf kasta oo dulmi fashay leedahay waxa dhulka ku sugan way isku furan lahayd, waxayna qarsan gaaladu shalayto markay Arkaan Cadaabka, waxaana lagu kala xukmin Dhexdooda Xaq lamana dulminayo.

وَلَوْ أَنَّ لِكُلِّ نَفْسٍ ظَلَمَتْ مَا فِى ٱلْأَرْضِ لَٱفْتَدَتْ بِهِۦ ۗ وَأَسَرُّوا۟ ٱلنَّدَامَةَ لَمَّا رَأَوُا۟ ٱلْعَذَابَ ۖ وَقُضِىَ بَيْنَهُم بِٱلْقِسْطِ ۚ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ ﴿٥٤﴾

**Cadaabka Eebe wax la dedejisto ma aha, illeen markuu dhaco calaacal iyo waan rumeeyey wax ma tartee, waxaase lagu odhan kuwii dulmi falay Dhadhamiya cadaabka waaridda waxaad kasbaneyseen umbaa laydinka Abaal marine. Waxayna gaaladu Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) warsanayeen ma Xaqbaa Quraanku, waxaana Eebe faray inuu yidhaahdo haa waa xaq, Eebahaybaan ku dhaartaye, waxna ma daalisaan hadday nafu hanato iyadoo dulmi fashay waxa dhulka ku sugan way isku furan lahayd, waxayna qarsadaan qoomamo markay arkaan cadaabka waxaana lagu kala xukmin Caddaalad lamana dulmiyo.**
**Taasina waxay muujinaysaa Xaqnimada quraanka iyo Nabiga iyo darrida Cadaabka Eebe oy Waajib tahay in la darbado si looga nabadgalo. Yuunus (50-54).**

---

55. Eebana waxaa u sugnaaday waxa ku sugan Samooyinka iyo Dhulka, yabooha Eebana waa Xaq Dadka badankiisuse ma oga.

أَلَآ إِنَّ لِلَّهِ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۗ أَلَآ إِنَّ وَعْدَ ٱللَّهِ حَقٌّ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٥٥﴾

56. Eebaa wax nooleeya waxna dila xaggiisaana laydiin soo celin.

هُوَ يُحْىِۦ وَيُمِيتُ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٥٦﴾

57. Dadow waxaa idiin timid Waano Eebihiin iyo Caafimaadka waxa Laabta ku sugan iyo Hanuun iyo naxariista Mu‘miniinta.

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ قَدْ جَآءَتْكُم مَّوْعِظَةٌ مِّن رَّبِّكُمْ وَشِفَآءٌ لِّمَا فِى ٱلصُّدُورِ وَهُدًى وَرَحْمَةٌ لِّلْمُؤْمِنِينَ ﴿٥٧﴾

58. Waxaad dhahdaa Fadliga Eebe iyo Naxriistiisa arintaas ha ku farxeen (Mu'miniintu) iyadaa ugu Khayrroon waxay kulmine.

قُلْ بِفَضْلِ ٱللَّهِ وَبِرَحْمَتِهِۦ فَبِذَٰلِكَ فَلْيَفْرَحُوا۟
هُوَ خَيْرٌ مِّمَّا يَجْمَعُونَ ﴿٥٨﴾

59. waxaad dhahdaa ka warrama waxa Eebe idiin soo dejiyo oo Risqi ah ood ka yeesheen Qaar ka mida Xaaraan (qaarna) Xalaal, waxaad dhahdaa ma Eebaa idiin idmay mise Eebaad ku Beenabuuranaysaan.

قُلْ أَرَءَيْتُم مَّآ أَنزَلَ ٱللَّهُ لَكُم مِّن رِّزْقٍ
فَجَعَلْتُم مِّنْهُ حَرَامًا وَحَلَٰلًا قُلْ ءَآللَّهُ أَذِنَ
لَكُمْ ۖ أَمْ عَلَى ٱللَّهِ تَفْتَرُونَ ﴿٥٩﴾

60. Maxay u malayn kuwa ku been abuuran Eebe (inuu ku fali) Maalinta Qiyaame, Eebe waa kan Fadliga ku leh Dadka badankooduse kuma mahadiyaan.

وَمَا ظَنُّ ٱلَّذِينَ يَفْتَرُونَ عَلَى ٱللَّهِ ٱلْكَذِبَ
يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ ۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَذُو فَضْلٍ عَلَى ٱلنَّاسِ
وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَشْكُرُونَ ﴿٦٠﴾

Eebaana iska leh Xukunka cirka iyo dhulka, yaboohiisuna waa Xaq, mase oga Badankoodu, Isagaana Eebe wax nooleeya waxna dila, Xaggiisaana Loo noqon, waxaana Dadka soo gaadhay Waano xagga Eebe ka timid oo Quraanka ah iyo Caafiyaha waxa Laabta ku sugan iyo Hanuunka iyo Naxariista Mu'miniinta Fadliga Eebe iyo naxariistiisana ha ku Farxeen iyadaa ka fiican waxay kulmin oo Aduunyo ahe. Gaaladuna Xaq uma leh inay Risqiga Eebe qaarna xarrimaan qaaarna Xalaaleeyaan, Eebe uma idmin sidaas ee way ku Been abuuran Eebe, maxayse u malayn kuwa ku been abuuran Eebe waxay mudan maalinta Qiyaame, Eebaana wax Xalaaleeya, waxna xarrima, laguna mahadiyaa, Awooddana leh. Yuunus (55-60).

---

61. Wixii Xaala ood ku Sugan tahay wixii quraana ood Akhrin, wixii camala ood falaysaan waan idin la joognaana (ognahay) markaad dhex galaysaan, kagama Qarsoona Eebahaa waxa u yar Dhulka dhexdiisa iyo Samada, wixii ka yar iyo wixii ka wayna Kitaab cad bay ku suganyihiin.

وَمَا تَكُونُ فِى شَأْنٍ وَمَا تَتْلُوا۟ مِنْهُ مِن قُرْءَانٍ
وَلَا تَعْمَلُونَ مِنْ عَمَلٍ إِلَّا كُنَّا عَلَيْكُمْ شُهُودًا
إِذْ تُفِيضُونَ فِيهِ ۚ وَمَا يَعْزُبُ عَن رَّبِّكَ مِن مِّثْقَالِ
ذَرَّةٍ فِى ٱلْأَرْضِ وَلَا فِى ٱلسَّمَآءِ وَلَآ أَصْغَرَ مِن ذَٰلِكَ
وَلَآ أَكْبَرَ إِلَّا فِى كِتَٰبٍ مُّبِينٍ ﴿٦١﴾

62. Awliyada Eebana cabsi masaarra mana murugoodaan.

أَلَآ إِنَّ أَوْلِيَآءَ ٱللَّهِ لَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ
يَحْزَنُونَ ﴿٦٢﴾

63. waana kuwa rumeeyay (xaqa) dhawrsadana.

ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَكَانُوا۟ يَتَّقُونَ ﴿٦٣﴾

64. Waxaana u sugnaaday Bishaaro nolosha adduunyo iyo Aakhiraba, wax badali Kalimada Eebena ma jiro, taasina waa uun Liibaanta wayn.

لَهُمُ ٱلْبُشْرَىٰ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا وَفِى ٱلْءَاخِرَةِ ۚ
لَا تَبْدِيلَ لِكَلِمَٰتِ ٱللَّهِ ۚ ذَٰلِكَ هُوَ ٱلْفَوْزُ
ٱلْعَظِيمُ ﴿٦٤﴾

وَلَا يَحْزُنكَ قَوْلُهُمْ إِنَّ الْعِزَّةَ لِلَّهِ جَمِيعًا
هُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ ﴿٦٥﴾

65. yuuna ku walbahaarin hadalkoodu cisi dhamaantiis Eebaa iska leh, waana Maqle oge.

Wax kasta oo la Fali iyo hadii Quraan la akhrin Eebe waa ogyahay marka la dhex geli, wax Eebe kaga qarsoomi cirka iyo Dhulkana ma jiro, ama ha u yaraado sida Darraada ama ha ka sii yaraado ama ha ka waynaado illeen wax kasta Kitaab cad bay ku suganyihin, Awliyada ilaahayna cabsi iyo Walbahaar ma arkaan Aakhiro, waase kuwee waa kuwa Eebe rumeeyay ee ka Dhawrsada xumaanta, waxayna heli bishaaro Aduun iyo Aakhiraba, wax hadalka Eebe badalina ma jiro, taasina waa liibaanta wayn. waxaana kuu muuqda tilmaanta Awliyada Eebe oo ah kuwa Xaqa si dhaba u rumeeyay, raacana Quraanka iyo sunnada Nabiga (naxariis iyo nabad galyo Eebe korkiisa ha yeelee) si dhabana ugu toosnaada Diinta iyo waxayfari, Ciddiise aan tilmaantaas ku sifoobin ma aha wali Eebe lagumana sheegi karo, waxaase lagu garan Diinta dhab ma u raacay.
Bishaaradа adduunka wuxuu, Nabigu ku fasiray riyada fiican oo ruux arko ama loo arko, Aakhirana waa Jannada, waana kuwaas kuwaan cabsanaynin marka dadku cabsado oon murugoonayn marka dadku murugoodo, waana kuwa dar Eebe isu jeclaado iyagoon Qaraabo isku xidhayn xoolana isasiin, waase in Xaqa lagu dadaalo. Yuunus (61-65).

---

أَلَا إِنَّ لِلَّهِ مَن فِي السَّمَاوَاتِ وَمَن فِي الْأَرْضِ
وَمَا يَتَّبِعُ الَّذِينَ يَدْعُونَ مِن دُونِ اللَّهِ
شُرَكَاءَ إِن يَتَّبِعُونَ إِلَّا الظَّنَّ وَإِنْ هُمْ
إِلَّا يَخْرُصُونَ ﴿٦٦﴾

66. Eebaa iska leh waxa samooyinka iyo Dhulka ku sugan, waxay raacayaan oy Caabudi Eebe ka sokow waa Shurako (Sanamyo) waxaan mala ahayna ma raacayaan, waxaan beenaalayaal ahaynna ma aha.

هُوَ الَّذِي جَعَلَ لَكُمُ اللَّيْلَ لِتَسْكُنُوا فِيهِ
وَالنَّهَارَ مُبْصِرًا إِنَّ فِي ذَٰلِكَ
لَآيَاتٍ لِّقَوْمٍ يَسْمَعُونَ ﴿٦٧﴾

67. Eebe waa kan idiin yeelay Habeenka inaad xasishaan, Maalintana Arag (Ka yeelay) arrintaasna waxaa ugu sugan calaamooyin qoomkii wax maqli.

قَالُوا اتَّخَذَ اللَّهُ وَلَدًا سُبْحَانَهُ هُوَ الْغَنِيُّ
لَهُ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ
إِنْ عِندَكُم مِّن سُلْطَانٍ بِهَٰذَا أَتَقُولُونَ
عَلَى اللَّهِ مَا لَا تَعْلَمُونَ ﴿٦٨﴾

68. waxay dheheen wuxuu yeeshay Eebe Ilmo, waa nasahanyahay, Eebana waa uun Hodan, wuxuuna leeyahay waxa samooyinka iyo dhulka ku sugan, agtiinna xujo uma taal waxaas (Beenta) mise Eebaad ku sheegaysaan waxaydaan ogayn.

قُلْ إِنَّ الَّذِينَ يَفْتَرُونَ عَلَى اللَّهِ الْكَذِبَ
لَا يُفْلِحُونَ ﴿٦٩﴾

69. waxaad dhahdaa kuwa Eebe ku abuurta beenta ma liibaanaan.

70. waa uun raaxada adduunyo markaas xagganagaa noqoshadoodu noqon, markaasaan Dhadhansiinaynaa cadaab daran gaalnimadooda darteed.

مَتَٰعٞ فِي ٱلدُّنۡيَا ثُمَّ إِلَيۡنَا مَرۡجِعُهُمۡ ثُمَّ نُذِيقُهُمُ
ٱلۡعَذَابَ ٱلشَّدِيدَ بِمَا كَانُواْ يَكۡفُرُونَ ٧٠

Eebaa leh Cirka iyo dhulka iyo Khalqigoo dhan, Gaalana wax dhaba ma caabudayaan ee waxay ku socdaan malo iyo been, iyagoo diidan Eebaha habeenka xasil ka yeelay, Maalintiina Iftiin iyo waqti wax arag, waana arrin Mudan in lagu waano qaato ciddii wax maqli. Beenbayna illeen sheegeen iyagoo ku sheegi Eebe Ilmo isagoo ka nasahan, khalqigoo dhan yuu leeyahaye, wax xujo ahna ma hayaan, waxayna Eebe ku sheegi waxayna ogayn, ciddii Eebe ku been abuuratana ma liibaanto, waa muddo yar nolosha adduun, waxaana loo celin Eebe wuxuuna dhadhansiin cadaab daran Gaalnimadooda darteed, taasina waa ciqaabta Gaalada xaqa diida. Yuunus (66-70).

---

71. ku akhri korkooda warkii Nabi Nuux markuu ku yidhi qoomkiisii qoomkayow hadday idin la waynaatay Nagaadigayga iyo ku waanintayada aayaadka Eebe waxaan tala saartay Eebe ee kulmiya amarkiinna iyo shurakadiinna yuuna ahaan amarkiinna wax qarsoon (oo dhiba) markaas i xukuma hana i sugina.

۞وَٱتۡلُ عَلَيۡهِمۡ نَبَأَ نُوحٍ إِذۡ قَالَ لِقَوۡمِهِۦ يَٰقَوۡمِ إِن كَانَ
كَبُرَ عَلَيۡكُم مَّقَامِي وَتَذۡكِيرِي بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ فَعَلَى ٱللَّهِ
تَوَكَّلۡتُ فَأَجۡمِعُوٓاْ أَمۡرَكُمۡ وَشُرَكَآءَكُمۡ ثُمَّ لَا يَكُنۡ
أَمۡرُكُمۡ عَلَيۡكُمۡ غُمَّةٗ ثُمَّ ٱقۡضُوٓاْ
إِلَيَّ وَلَا تُنظِرُونِ ٧١

72. haddaad jeedsataan idin warsanmaayo ujuuro, ujuuradayda waxaa isiin Eebe, waxaana lay faray inaan ka mid ahaado Muslimiinta.

فَإِن تَوَلَّيۡتُمۡ فَمَا سَأَلۡتُكُم مِّنۡ أَجۡرٍۖ إِنۡ أَجۡرِيَ إِلَّا
عَلَى ٱللَّهِۖ وَأُمِرۡتُ أَنۡ أَكُونَ مِنَ ٱلۡمُسۡلِمِينَ ٧٢

73. Wayna beeniyeen waxaana ku korinnay Nabi Nuux iyo intii la jirtay Doontii, waxaana ka yeelay kuwo u hadha dhulka, waxaana maanshaynay kuwii beeniyey Aayaadkannaga ee day siday noqotay cidhibtii kuwii loo digay.

فَكَذَّبُوهُ فَنَجَّيۡنَٰهُ وَمَن مَّعَهُۥ فِي ٱلۡفُلۡكِ وَجَعَلۡنَٰهُمۡ
خَلَٰٓئِفَ وَأَغۡرَقۡنَا ٱلَّذِينَ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِنَاۖ فَٱنظُرۡ
كَيۡفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلۡمُنذَرِينَ ٧٣

Qisada Nabi Nuux iyo nabiyo kale oo badanba wax badan bay ku soo aroortay Quraanka, meelo badanna lagu sheegay waxaana habboon in lagu waano qaato illeen wuxuu Eebe u soo celceliyey in lagu waano qaato, lagana leexdo jidkoodii iyo Camalkii Xumaa, waxayna noqotay cidhibtii qoomkii Nabi Nuux khasaare, halaag iyo jab, markay khilaafeen amarkii Eebe Beeniyeenna Nabi Nuux, waana sidaas Abaalka xaqdiidayaasha ka madax adayga wanaagga, xumaantana ku madax taaga, Ciddii Eebe ku kalsoonaata, rumaaysa, xaqa ku socota, wanaaggana fasha cid wax yeeli karta oon Eebe ahayn ma jirto, illeen ciddii Eebe talasaarata wuu ku filanyahaye. Yuunus (71-73).

74. markaas kadib waxaan u Bixinnay Rasuullo Qoomkoodii Waxayna ula yimaadeen xujooyin, mana Rumayn beenintoodii darteed ee horraysay Saasaan u Daabacnaa «daboollaa» Quluubta xadgudbayaasha.

ثُمَّ بَعَثْنَا مِنۢ بَعْدِهِۦ رُسُلًا إِلَىٰ قَوْمِهِمْ فَجَآءُوهُم
بِٱلْبَيِّنَٰتِ فَمَا كَانُوا۟ لِيُؤْمِنُوا۟ بِمَا كَذَّبُوا۟ بِهِۦ مِن قَبْلُ
كَذَٰلِكَ نَطْبَعُ عَلَىٰ قُلُوبِ ٱلْمُعْتَدِينَ ﴿٧٤﴾

75. markaasaan u Bixinay gadaashood (Nabi) Muuse iyo (Nabi) Haaruun fircoon iyo colkiisii iyagoo Wata aayaadkannagii, wayna Isla waynaadeen waxayna Noqdeen Qoom dambiilayaal ah.

ثُمَّ بَعَثْنَا مِنۢ بَعْدِهِم مُّوسَىٰ وَهَٰرُونَ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ
وَمَلَإِي۟هِۦ بِـَٔايَٰتِنَا فَٱسْتَكْبَرُوا۟ وَكَانُوا۟ قَوْمًا
مُّجْرِمِينَ ﴿٧٥﴾

76. markuu uga yimid Xaqu Xaggannaga waxay Dhaheen kani waa sixir cad.

فَلَمَّا جَآءَهُمُ ٱلْحَقُّ مِنْ عِندِنَا قَالُوٓا۟
إِنَّ هَٰذَا لَسِحْرٌ مُّبِينٌ ﴿٧٦﴾

77. Wuxuuna yidhi (Nabi) Muuse ma waxaad ku Dhahaysaan Xaqa markuu idiin yimid ma Sixirbaa kani?isagoosan Liibaanin saaxiriintu.

قَالَ مُوسَىٰٓ أَتَقُولُونَ لِلْحَقِّ لَمَّا جَآءَكُمْ
أَسِحْرٌ هَٰذَا وَلَا يُفْلِحُ ٱلسَّٰحِرُونَ ﴿٧٧﴾

78. Waxayna dhaheen ma waxaad noogu timid inaad naga leexisid waxaan ka hellay Aabayaalkanno oy idiin Ahaato waynaanta Dhulka (xukunka) annagu idinka idin Rumaynmaynno.

قَالُوٓا۟ أَجِئْتَنَا لِتَلْفِتَنَا عَمَّا وَجَدْنَا عَلَيْهِ ءَابَآءَنَا
وَتَكُونَ لَكُمَا ٱلْكِبْرِيَآءُ فِى ٱلْأَرْضِ وَمَا نَحْنُ لَكُمَا
بِمُؤْمِنِينَ ﴿٧٨﴾

Aayadahanna waxay ka warrami Rasuulladuu diray Eebe iyo qisadii Nabi Muuse iyo Haaruun iyo wixii dhex maray Fircoon iyo Qoomkiisii iyo Nabiyadaas, markay is Kibriyeen ahaadeenna Danbiilayaal, kuna sheegeen Xaqii sixir, Nabi Muusana u sheegay in ciddii Xaqa sixir ku sheegta ayan liibaanaynin, markaasay tuhmaysteen iyagoo Sheegi inuu dooni Nabi Muuse inuu ka leexiyo waxay Aabayaalkood ka heleen oo markaas u ahaato Sharafta iyo awooddu Nabi muuse iyo Qoomkiisa, waxayna Caddeeyeen inayan marna rumaynayn, taasina waa Caadada iyo Dabeecadda Gaalada iyo xaqdiidayaasha oo ku sheega Xaqsheegayaasha Xumaan iyo awood ujeed iyo ceebo ayna lahayn, Xaqaase guushu ku danbayn. Yuunus (74-78).

---

79. wuxuu yidhi fircoon ii keena saaxir cilmi badan oo dhan.

وَقَالَ فِرْعَوْنُ ٱئْتُونِى بِكُلِّ سَٰحِرٍ عَلِيمٍ ﴿٧٩﴾

80. markay yimaadeen saaxiriintiina wuxuu ku yidhi (Nabi) Muuse Tuura waxaad Tuuraysaan.

فَلَمَّا جَآءَ ٱلسَّحَرَةُ قَالَ لَهُم مُّوسَىٰٓ أَلْقُوا۟ مَآ أَنتُم
مُّلْقُونَ ﴿٨٠﴾

81. markay tuureenna wuxuu yidhi (Nabi) Muuse sixir baad la timaadeen Eebaana Burin, Eebana ma hagaajiyo camalka fasaadiyayaasha.

فَلَمَّآ أَلْقَوْا۟ قَالَ مُوسَىٰ مَا جِئْتُم بِهِ ٱلسِّحْرُ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ
سَيُبْطِلُهُۥٓ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُصْلِحُ عَمَلَ ٱلْمُفْسِدِينَ ﴿٨١﴾

82. wuxuuna ku sugaa Eebe xaqa kalimadiisa haba naceen Dambiilayaashuye.

وَيُحِقُّ ٱللَّهُ ٱلْحَقَّ بِكَلِمَٰتِهِۦ وَلَوْ كَرِهَ
ٱلْمُجْرِمُونَ ﴿٨٢﴾

83. ma rumaynin Nabi Muuse Farac yar oo Qoomkiisii ka mida mooyee iyagoo ka Cabsan fircoon iyo Kooxdiisii inay fidmeeyaan, fircoonna wuu isku kibriyey dhulka wuxuuna ka mid ahaa xadgudbayaaaha.

فَمَآ ءَامَنَ لِمُوسَىٰٓ إِلَّا ذُرِّيَّةٌ مِّن قَوْمِهِۦ عَلَىٰ خَوْفٍ
مِّن فِرْعَوْنَ وَمَلَإِي۟هِمْ أَن يَفْتِنَهُمْ ۚ وَإِنَّ فِرْعَوْنَ
لَعَالٍ فِى ٱلْأَرْضِ وَإِنَّهُۥ لَمِنَ ٱلْمُسْرِفِينَ ﴿٨٣﴾

Saasuuna Fircoon isula waynaaday una codsaday in loo soo kulmiyo Ciddii sixirka taqaan, markaasay yimaaddeen waxaana dhexmaray isaga iyo Nabi Muuse arrimihii wax badan quraanku ka warramay oo ah in guushii Nabi Muuse raacday Saaxiriintiina Islaameen oo xaqa raaceen, Eebana tirtiray sixirkii illeen dhagarlow ma liibaanee, xaqiina wuu sugay haba naceen dambiilayaashuye, Nabi Muusana markaas waxaa rumayey dad yar oo Fircoon ka cabsan illeen Fircoon wuxuu ahaa Nin isla wayn oo xad gudba, maxaase u dambeeyey isaga iyo Colkiisii Kibray waxaa ka warrami aayadaha soo socda. Yuunus (79-83).

---

84. wuxuu yidhi (Nabi) Muuse Qoomkayow haddaad tihiin kuwa rumeeyey Eebe isaga uun tala saarta haddaad Muslimiin Tihiin.

وَقَالَ مُوسَىٰ يَٰقَوْمِ إِن كُنتُمْ ءَامَنتُم بِٱللَّهِ فَعَلَيْهِ تَوَكَّلُوٓا۟
إِن كُنتُم مُّسْلِمِينَ ﴿٨٤﴾

85. waxayna dheheen Ilaahay yaan talo saarannay, Eebahannow hanooga yeelina fidmo Qoomka Daalimiinta ah.

فَقَالُوا۟ عَلَى ٱللَّهِ تَوَكَّلْنَا رَبَّنَا لَا تَجْعَلْنَا فِتْنَةً لِّلْقَوْمِ
ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٨٥﴾

86. nagana kori naxariistaada darteed qoomka gaalada ah.

وَنَجِّنَا بِرَحْمَتِكَ مِنَ ٱلْقَوْمِ ٱلْكَٰفِرِينَ ﴿٨٦﴾

87. waxaana u waxyoonay (Nabi) Muuse iyo walaalkiis inaad uga yeeshaan Qoomkiinna Masar Guryo kana yeesha guryihiinna Qiblada (Ku tukada) ooga salaadda una bishaaree Mu‘miniinta.

وَأَوْحَيْنَآ إِلَىٰ مُوسَىٰ وَأَخِيهِ أَن تَبَوَّءَا لِقَوْمِكُمَا
بِمِصْرَ بُيُوتًا وَٱجْعَلُوا۟ بُيُوتَكُمْ قِبْلَةً
وَأَقِيمُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ ۗ وَبَشِّرِ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٨٧﴾

88. wuxuuna yidhi (Nabi) Muuse Eebahannow adaa siiyey Fircoon iyo Kooxdiisa Qurux iyo Xoolo Nolosha adduunka Eebow inay ka dhumiyaan Jidkaaga Eebow halaag (Tirtir) Xoolahooda Adkeena Quluubtooda oo yeyna rumeynin intay ka arkaan Cadaab daran.

وَقَالَ مُوسَىٰ رَبَّنَآ إِنَّكَ ءَاتَيْتَ فِرْعَوْنَ
وَمَلَأَهُۥ زِينَةً وَأَمْوَٰلًا فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا رَبَّنَا
لِيُضِلُّوا۟ عَن سَبِيلِكَ رَبَّنَا ٱطْمِسْ عَلَىٰٓ أَمْوَٰلِهِمْ
وَٱشْدُدْ عَلَىٰ قُلُوبِهِمْ فَلَا يُؤْمِنُوا۟ حَتَّىٰ يَرَوُا۟
ٱلْعَذَابَ ٱلْأَلِيمَ ﴿٨٨﴾

89. Eebe wuxuu yidhi waa la ajiibay Baryadiinna ee toosnaada hana raacina Jidka kuwaan wax ogayn.

قَالَ قَدْ أُجِيبَت دَّعْوَتُكُمَا فَٱسْتَقِيمَا
وَلَا تَتَّبِعَآنِّ سَبِيلَ ٱلَّذِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٨٩﴾

**Nabi Muuse Qoomkiisii yuu u dardaarmay inay Eebe talo saartaan waxayna Eebe warsadeen Wanaag iyo Naxariis, Eebana wuxuu faray Nabi Muuse iyo Haaruun inay Dadka Masar dajiyaan, guryahana ku tukadaan, Salaaddana oogaan, una Bishaareeyaan Mu‘miniinta, Nabi Muusana wuxuu habaaray Fircoon iyo Qoomkiisii Eebana waa ka aqbalay Baryadii, wuxuuna faray Toosnaan iyo inayna raacin Jidka Jaahiliinta, Taasina waxay ku tusin in wanaagga iyo jidka toosan lagu socdo oon la leexanin. Yuunus (84-89).**

---

90. waxaan tallaabinay Banii Israa‘iil Badda waxayna u raaceen Fircoon iyo Qoomkiisii kibir iyo cadaawanimo, markay haleeshay maansheyntiina wuxuu yidhi (Fircoon) waxaan rumeeyey inaan Eebahay rumeeyeen BaniiIsraa‘iil mooyee Ilaah kale jirin waxaana ka mid ahay Muslimiinta.

۞ وَجَٰوَزْنَا بِبَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ٱلْبَحْرَ فَأَتْبَعَهُمْ
فِرْعَوْنُ وَجُنُودُهُۥ بَغْيًا وَعَدْوًا حَتَّىٰٓ إِذَآ أَدْرَكَهُ
ٱلْغَرَقُ قَالَ ءَامَنتُ أَنَّهُۥ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا ٱلَّذِىٓ ءَامَنَتْ
بِهِۦ بَنُوٓا۟ إِسْرَٰٓءِيلَ وَأَنَا۠ مِنَ ٱلْمُسْلِمِينَ ﴿٩٠﴾

91. (Eebe wuxuu yidhi) hadda (Miyaad rumeyn) adoo horay u caasiyey oodna ka mid ahayd kuwa wax fasaadiya.

ءَآلْـَٔنَ وَقَدْ عَصَيْتَ قَبْلُ وَكُنتَ
مِنَ ٱلْمُفْسِدِينَ ﴿٩١﴾

92. Maanta waxaannu korin badankaaga inaad u noqotid Cidda kaa dambaysa Calaamo wax badan oo Dadka ka mida Aayaadkannaga waa halmaansanyihiin.

فَٱلْيَوْمَ نُنَجِّيكَ بِبَدَنِكَ لِتَكُونَ لِمَنْ خَلْفَكَ ءَايَةً
وَإِنَّ كَثِيرًا مِّنَ ٱلنَّاسِ عَنْ ءَايَٰتِنَا لَغَٰفِلُونَ ﴿٩٢﴾

93. waxaan dejinay Banii Israa‘iil Dejin runa (meel fiican) waxaana ku arsaaqnay wanaag, waxayna is khilaafeen markuu cilmigu u yimid, Eebahaana

وَلَقَدْ بَوَّأْنَا بَنِىٓ إِسْرَٰٓءِيلَ مُبَوَّأَ صِدْقٍ وَرَزَقْنَٰهُم
مِّنَ ٱلطَّيِّبَٰتِ فَمَا ٱخْتَلَفُوا۟ حَتَّىٰ جَآءَهُمُ ٱلْعِلْمُ إِنَّ رَبَّكَ

wuu kala xukumi maalinta Qiyaame waxay isku khilaafeen.

يَقۡضِي بَيۡنَهُمۡ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِ فِيمَا كَانُواْ فِيهِ
يَخۡتَلِفُونَ ٩٣

**Halkan wuxuu Eebe ku caddayn siduu u maansheeyey Fircoon iyo Colkiisii, waxaana dhacay in markii Banii Israa‘iil gudbeen, Fircoon iyo Dadkiisiina Biyaha Badda ku dhex jiraan Eebe Maansheeyey siday Aayado kale Caddeeyeen, markaasna uu Dambiile Fircoon isku dayey inuu Eebe qiro, maxaase laga aqbali markaas oo kale, mar hadduu ahaa dulmi badane, Col ah, Caasi ah, oo Mufsid ah, waxaase Eebe koriyey Badankiisii si ciddii ka dambaysa ay calaamad Xaqnimada Eebe ugu noqoto oyna u halmaamin, markaasaa Eebe dejiyey Banii Isaraa‘iil meel roon kuna Arsuqay wanaag, waxay isku khilaafaanna Eebaa kala xukumi Qiyaamada, Saasuuna xaqii u guulaystay Baadilkii iyo Kibirkiina u jabeen una halaagsameen. Yuunus (90-93).**

---

94. haddaad Shakisantahay waxaan kugu soo Dejinay warso kuwa Akhriya Kitaabka hortaa, waxaa kaaga yimid xagga Eebe Xaq, ee ha Noqonin kuwa Shakiya.

فَإِن كُنتَ فِي شَكّٖ مِّمَّآ أَنزَلۡنَآ إِلَيۡكَ فَسۡـَٔلِ ٱلَّذِينَ
يَقۡرَءُونَ ٱلۡكِتَٰبَ مِن قَبۡلِكَۚ لَقَدۡ جَآءَكَ
ٱلۡحَقُّ مِن رَّبِّكَ فَلَا تَكُونَنَّ مِنَ ٱلۡمُمۡتَرِينَ ٩٤

95. hana ka mid noqon kuwa beeniya Aayaadka Eebe ood ka mid noqoto kuwa Khasaaray.

وَلَا تَكُونَنَّ مِنَ ٱلَّذِينَ كَذَّبُواْ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ
فَتَكُونَ مِنَ ٱلۡخَٰسِرِينَ ٩٥

96. kuwa ku waajibtay Kalimadii Eebahaa (Ciqaab) rumeynmaayayaan.

إِنَّ ٱلَّذِينَ حَقَّتۡ عَلَيۡهِمۡ كَلِمَتُ رَبِّكَ
لَا يُؤۡمِنُونَ ٩٦

97. xataa haddaad ula timaaddid Aayad kasta, intay ka arkaan Cadaab Daran.

وَلَوۡ جَآءَتۡهُمۡ كُلُّ ءَايَةٍ حَتَّىٰ يَرَوُاْ ٱلۡعَذَابَ
ٱلۡأَلِيمَ ٩٧

98. maxay u jiriwayday Magaalo rumeysa (Xaqa) oo uu anfaco Iimaankeedu, laakiin Qoomkii (Nabi) Yuunus markay rumeeyeen waxaan ka faydnay Cadaabkii dulliga ee Adduunka, waxaana u raaxaynay tan iyo Muddo.

فَلَوۡلَا كَانَتۡ قَرۡيَةٌ ءَامَنَتۡ فَنَفَعَهَآ إِيمَٰنُهَآ إِلَّا قَوۡمَ
يُونُسَ لَمَّآ ءَامَنُواْ كَشَفۡنَا عَنۡهُمۡ عَذَابَ ٱلۡخِزۡيِ
فِي ٱلۡحَيَوٰةِ ٱلدُّنۡيَا وَمَتَّعۡنَٰهُمۡ إِلَىٰ حِينٖ ٩٨

99. hadduu doono Eebahaa waxaa rumayn lahaa waxa Dhulka ku sugan oo dhan, ee ma adaa Dad ku qasbi intay ka rumeeyaan (Xaqa).

وَلَوۡ شَآءَ رَبُّكَ لَأٓمَنَ مَن فِي ٱلۡأَرۡضِ كُلُّهُمۡ
جَمِيعًاۚ أَفَأَنتَ تُكۡرِهُ ٱلنَّاسَ حَتَّىٰ يَكُونُواْ
مُؤۡمِنِينَ ٩٩

100. nafuna ma rumeyso idanka Eebe ka dib mooyee, wuxuuna Eebe yeelaa xumaanta kuwaan wax kasayn korkooda.

وَمَا كَانَ لِنَفْسٍ أَن تُؤْمِنَ إِلَّا بِإِذْنِ ٱللَّهِ ۚ
وَيَجْعَلُ ٱلرِّجْسَ عَلَى ٱلَّذِينَ لَا يَعْقِلُونَ ﴿١٠٠﴾

Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ma shakinin waxa lagu soo dejin, ee waxaa diidi Dadka, mana aha in cidna Shaki ka galo Xaqa, Ciddiise Eebe u qoray Ciqaab iyo rumeyn la‘aan ma rumeyso intay Ciqaab daran ka arkaan, waxaana ku habboon inay Magaalo kastaba Dadkeedu Xaqa rumeeyo, waxaana Eebe ka toobad aqbalay Qoomkii Nabi Yuunus markay rumeeyeen, waxayna ku noolaadeen Adduunka tan iyo Muddo, hanuunkana Eebaa hanta, hadduu doonana waxaa xaqa rumeyn waxa Dhulka ku nool oo dhan, mase aha in Dadka lagu Qasbo Rumeynta, Nafuna ma rumeeyso idanka Eebe la‘aantiis, xumaanna waxaa mudan kuwaan Xaqa kasayn, Taasina waxay ku tusin Xaqa iyo Wanaagga, lana shakiyin Xaqa lana warsado Eebe ku sugidda Xaqa, had iyo jeerna Eebe lagu xidhnaado lana warsado hanuun, Khayr iyo Sugnaan, illeen Eebaa awoodda iska leh, wax kastana Awoodiisa ku jiraan waase in si dhaba loogu Dhaqmo Xaqa. Yuunus (94-100).

---

101. waxaad dhahdaa daya waxa ku sugan Samooyinka iyo Dhulka waxna kama deeqaan Aayado (Calaamooyin) iyo Digid qoom aan rumeyn (Xaqa).

قُلِ ٱنظُرُوا۟ مَاذَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ وَمَا تُغْنِى
ٱلْءَايَٰتُ وَٱلنُّذُرُ عَن قَوْمٍ لَّا يُؤْمِنُونَ ﴿١٠١﴾

102. ma waxay sugi waxaan ahayn Ayaamihii kuwii tagay hortood oo kale, waxaad dhahdaa suga anna waan idinla sugiye.

فَهَلْ يَنتَظِرُونَ إِلَّا مِثْلَ أَيَّامِ ٱلَّذِينَ خَلَوْا۟
مِن قَبْلِهِمْ ۚ قُلْ فَٱنتَظِرُوٓا۟ إِنِّى مَعَكُم
مِّنَ ٱلْمُنتَظِرِينَ ﴿١٠٢﴾

103. markaasaan korinnaa Rasuullada iyo kuwa rumeeyey saasaana Xaq nagu ah, inaan u korinno Mu‘miniinta.

ثُمَّ نُنَجِّى رُسُلَنَا وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ ۚ كَذَٰلِكَ حَقًّا
عَلَيْنَا نُنجِ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٠٣﴾

104. waxaad dhahdaa Dadow haddaad tihiin kuwo shakisan diintayda Caabudi maayo waxaad caabudaysaan oo Eebe ka soo hadhay waxaanse Caabudi Eebaha idin Dili, waxaana lay faray inaan ka mid noqdo Mu‘miniinta.

قُلْ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِن كُنتُمْ فِى شَكٍّ مِّن دِينِى فَلَآ أَعْبُدُ
ٱلَّذِينَ تَعْبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ وَلَٰكِنْ أَعْبُدُ ٱللَّهَ ٱلَّذِى
يَتَوَفَّىٰكُمْ ۖ وَأُمِرْتُ أَنْ أَكُونَ مِنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿١٠٤﴾

105. iyo inaan u jeediyo wajiga Diinta anoo Toosan hana ka mid noqonin Mushrikiinta.

وَأَنْ أَقِمْ وَجْهَكَ لِلدِّينِ حَنِيفًا
وَلَا تَكُونَنَّ مِنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿١٠٥﴾

Dadku waa inay ku waano qaataan calaamooyinka Cirka iyo Dhulka, waxayse waanadu wax u tartaa kuwa Xaqa rumeeya, kuwaan Xaqa Rumeynse wax uma tarto, ciddii Xaqa ka jeedsataa ha sugto wixii ku dhacay Gaaladii ka horreeyey oo ciqaaba.
Wuxuuna Eebe koriyaa kuwa Xaqa rumeeya, Diinta Islaamkana Shaki ma leh, waana in laga fogaado cibaadada wax Eebe ka soo hadhay, illeen waxaa Cibaado mudan Ilaaha Dadka oofsan, farayna in Mu‘miniinta laga mid noqdo, Wajigana loo jeediyo xagga Eebe, lagana fogaado jidka Gaalada. Aayaduhuna wuxuu warkoodu ku koobanyahay in Abuurka Eebe lagu waano qaato, si dhaba loo caabudo, Jidka xun ee baadida ahna laga dheeraado. Yuunus (101-105).

106. Hana caabudin Eebe ka Sokow waxaan wax ku Tarayn kuna dhibayn, Haddaad fasho waxaad ka mid Noqon Daalimiinta.

وَلَا تَدْعُ مِن دُونِ ٱللَّهِ مَا لَا يَنفَعُكَ وَلَا يَضُرُّكَ ۖ
فَإِن فَعَلْتَ فَإِنَّكَ إِذًا مِّنَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿١٠٦﴾

107. Hadduu ku taabsiiyo Eebe dhib wax faydi oon isaga Ahayn ma jiro, Hadduu kula doono Khayrna wax celin kara fadligiisa ma jiro, Wuxuuna gaadhsiiyaa cidduu doono oo Addoomadiisa ka mida, waana Dambi dhaafe Naxariista.

وَإِن يَمْسَسْكَ ٱللَّهُ بِضُرٍّ فَلَا كَاشِفَ لَهُۥٓ إِلَّا هُوَ ۖ
وَإِن يُرِدْكَ بِخَيْرٍ فَلَا رَآدَّ لِفَضْلِهِۦ ۚ يُصِيبُ
بِهِۦ مَن يَشَآءُ مِنْ عِبَادِهِۦ ۚ وَهُوَ ٱلْغَفُورُ ٱلرَّحِيمُ ﴿١٠٧﴾

108. Waxaad dhahdaa Dadow waxaa idiinka yimid xagga Eebe Xaqii, ciddii Hanuuntana wuxuu uun u Hanuunay Naftiisa, cidii dhuntana wuxuu uun u Dhumay Naftiisa (Dhibkeeda) Anna korkiinna Wakiil uma ihi.

قُلْ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ قَدْ جَآءَكُمُ ٱلْحَقُّ مِن رَّبِّكُمْ ۖ
فَمَنِ ٱهْتَدَىٰ فَإِنَّمَا يَهْتَدِى لِنَفْسِهِۦ ۖ وَمَن ضَلَّ
فَإِنَّمَا يَضِلُّ عَلَيْهَا ۖ وَمَآ أَنَا۠ عَلَيْكُم بِوَكِيلٍ ﴿١٠٨﴾

109. Ee raac waxa laguu waxyooday Samirna inta Eebe ka kala Xukmin (Dadka) isagaa u Wanaagsan Xaakime.

وَٱتَّبِعْ مَا يُوحَىٰٓ إِلَيْكَ وَٱصْبِرْ حَتَّىٰ يَحْكُمَ ٱللَّهُ ۚ
وَهُوَ خَيْرُ ٱلْحَٰكِمِينَ ﴿١٠٩﴾

**Waxna ha ka dayin hana caabudin waxaan waxba kuu tarayn, Ciddii saas fashana Waxay ka mid noqon Daalimiinta, haduu Eebe Dhib kula doono wax kaa faydi kara oon isaga ahayn ma jiro, Hadduu khayr kula doonana wax celin kara Fadligiisa ma jiro, Cidduu doono yuuna siiyaa Naxariis waana danbi dhaafe Naxariista. Dadkana xaqbaa u yimid ciddii ku hanuuntana wuxuu wax u taray Naftiisa, ciddii Dhuntana wuxuu uun dhibay Naftiisa, Nabiguna (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Cidna ilaaliye uma aha, wuxuuna Eebe faray Nabiga iyo dadka kalaba inay raacaan Xaqa Eebe u waxyooday nabiga adkaystaana inta Eebe ka kala Xukmin illeen Eebaa xukunkiisu Caadilyahaye, Suuraduna waxay ku dhamaatay in Xaqa lagu fara adkaado lana raaco, laguna samro oo loo adkaysto arintaas. (Yuunus (106-109).**

## Suurat Huud سُورَةُ هُودٍ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Erayga hore wuxuu ku Tusin Mucjisada Quraanka, Kitaabka Quraanka ahna waa mid la sugay Aayadihiisa, markaas lagana Caddeeyey Eebaha Falka san ee wax walba og Xaggiisa.

الٓر ۚ كِتَٰبٌ أُحْكِمَتْ ءَايَٰتُهُۥ ثُمَّ فُصِّلَتْ مِن لَّدُنْ
حَكِيمٍ خَبِيرٍ ﴿١﴾